




Ka Socota Horjoogayaasha:

Ajendada deg degga ah ee
shaqada Hufan

Warbixin Kooban



Warbixin Kooban

Daba dheeraanshaha cudurka faafa ee COVID wuxuu suuqa shaqada u horseeday kala sareyn dhinaca jinsiga, isirka iyo dhaqaalaha intaba. Shaqaalaha horjoogayaasha ah waxay ku mashquuleen shaqooyin khatar ah sida quudin, daryeel iyo nadiifin iyagoo qaata mushaar aad u hooseeya, isla markaana aan haysan mushaarka maalmaha xanuunka iyo daryeel caafimaad midna – xitaa ma haystaan ilaalinta ku qeexan Sharciga Shaqaalaha (ESA) Goobaha shaqada waxaa si deg deg ugu faafay cudurka COVID, kaasoo sababy dhacdooyin naxdin leh maadaama uu aad u saameeyay dadka uusan midabkoodu caddeyn, soo galootiga iyo shaqaalaha ku shaqeeya mushaarka hoose. Arrintan sababta saldhigga u ah waxay tahay sinaan la'aan ka jirta shaqooyinka khatarta ah.

Hadda, shaqaalaha isku mashquuliyay in dhaqaalaha uu horumaro iyagoo aan ilaalin haysan waxay si wadajir ah u codsanayaan in sharci ahaan wax laga baddalo shaqooyinka khatarta ah, la cirib tiro sinaan la'aanta isla markaana la wanaajiyo mushaarka iyo xaaladaha shaqo. Wa in si deg deg ah wax looga qabto dul-duleellada shuruucda shaqada kuwaasoo waqtigan cudurka faafa sabab u noqday in ay sii ballaarato sinaan la'aanta.

Sinaan la'aanta iyo qiimaha nolosha marka ay kor u sii kacaan, waxay sababayaan in shaqaalaha Ontario ay halgan joogto ah ugu jiraan noloshooda. Waxaa lagama maarmaan ah in la kordhiyo mushaarka hoose si xoogsatada ay u bixiyaan kharajkooda, sida cunnada, ijaarka iyo daryeelka qoyskooda. Mushaar hufan, saacado hufan iyo mushaar siman in ay qaataan dadka isku meheradda ah waxay muhiim u tahay kala qaybinta

jinsiga iyo isirka ee ka jirta suuqa shaqada.

Isirka ka jira suuqa shaqada wuxuu micnihiisu yahay, Madow, Laatiin, Aasiyaan, Filibiin iyo shaqaalaha midabka in ay ku khasban yihiin shaqooyinka xun oo aan ilaalin lahayn, mushaar hoose iyo khatar aad u sarreysa. Shaqaalaha la midab takooro waxay inta badan haystaan shaqooyin ku meel gaar ah iyo kuwa waqtiga dhiman (part-time), loomana oggola in la siiyo mushaarka maalmaha xanuunka. Diiditaanka deggenaashaha qaxootiga oo kor u dhaafay 1.6 malyan wuxuu abuuray sababo ku xad gudbaya shuruucda shaqada. Isla markaana, shirkadaha waxay heleen dariiqyo u sahlaya in ay ku xad gudbaan shuruudaha ugu hooseeya ee ku qeexan shuruucda shaqada, kana faa'ideystaan dul-duleellada si ay masuuliyadooda ugu wareejiyaan shirkadaha ku meel gaarka ah isla markaana kala saarid khaldan (misclassification) darteed u diidaya xuquuqda shaqaalaha.

Maadaama laga soo baxay COVID, waxaa aad muhiim u ah in wax laga qabto sinaan la'aanta. Taasi micneheeda wuxuu yahay in la xoojiyo Shuruucda shaqada Ontario, lana tir-tiro dul-duleellada sare u qaadaya shaqooyinka khatarta ah; la cirib tiro dhiiri gelinta shirkadaha in ay bixiyaan mushaar hoose, saacado yar iyo shaqooyin aan amaan ahayn; in la dhaqan geliyo sharciga iyadoo la hirgelinayo ciqaab la dul saaro shirkadaha ku xad gudba sharciga. Xubnaha Ururka Difaaca Shaqaalaha (WAC) wuxuu diyaariyay xeeladaha dhameystiran ee ku xusan warbixintan oo haddii la hirgeliyo horseed u noqoneysa in qof kasta uu helo shaqo hufan.

Talooyinka oo kooban

MUSHAAR HUFAN

In la soo saaro sharci qeexaya:

- In mushaarka hooseeya laga dhigo \$20 qof kasta.
- In la dhowro sharciga qeexaya in sannad kasta la isku dheelli tiro mushaarka iyo sare u kaca qiimaha nolosha.
- In la joojiyo bixinta mushaar ka yar mushaarka ugu hooseeya, gaar ahaan mushaarka hoose ee la siiyo ardayda, shaqaalaha beeraha iyo kuwa kaleba.

SAACADO HUFAN

- In la soo saaro sharci damaanad qaadaya in shaqaalaha ay helaan toddobaad kasta saacado shaqo oo qoraal ah (schedules).
- In shaqaalaha ay ogaadaan saacadaha ay shaqeynaayaan laba toddobaad ka hor.
- Inta aan la qorin shaqaale cusub, waa in saacado dheeri ah la siiyo kuwa shaqeeya.

BIXINTA MUSHAARKA XANUUNKA

In la soo saaro sharci qeexaya:

- Shirkadaha in ay shaqaalahooda siiyaan 10 maalmood oo mushaarka xanuunka ah sannad kasta iyo 14 maalmood oo kale haddii uu soo shaac baxo cudur faafaya.

- In shirkadaha aysan shaqaalaha weydiinin warqad takhtar haddii ay qaataan fasaxa maalmaha xanuunka.

IN LA SIMO MUSHAARKA DADKA ISKU SHAQADA QABTA

In la soo saaro sharci shirkadaha ku khasbaya in:

- Ay siiyaan mushaar iyo xuquuq siman dadka isku shaqada qabta iyadoo aan loo fiirinin shaqaalaha saacadaha dhiman shaqeeya, kuwa heshiisyada ama kuwa sida ku meel gaarka ah ku shaqeeya.
- Ay siiyaan mushaar iyo xuquuq siman shaqaalaha iyadoo aan loo fiirinin jinsi, isir iyo/ama qaxootiga soo gelootiga ah.
- In qoraal ahaan loo soo dhejiyo mushaaraadka kala duwan ee shaqaalaha

SHARCI NA ILAALINAYA ANNAGA OO IDIL

In la xiro dhammaan dul-duleellada haatan jira

- In la soo saaro sharci ballaarinaya shuruucda shaqaalaha iyadoo lagu darayo xoogsatada oo idil, lana xiro dul-duleellada jira, gaar ahaan kuwa la xiriira mushaarka hoose.

Masuuliyad wareejinta shirkadaha

- In la soo saaro sharci qeexaya
- In shirkadaha ay masuul ka yihiin mushaarka,

xaaladaha shaqo iyo gor-gortan wadareedka, marka ay isticmaalaan shaqaalaha ku meel gaarka ah ama kuwa heshiisyada hoose ku shaqeeya.

- In la xaqiijiyo shirkadaha heshiisyada gelaya iyo kuwa u dullaala in ay labaduba masuul ka yihiin mushaarka aan la bixinin iyo xuquuqda ku xusan sharciga shaqaalaha (ESA).
- In la dhowro shaqada, mushaarka, xuquuqda, xubnimada ururada shaqaalaha ama shaqaalaha heshiisyada hoose marka qandaraaska uu dhammaado ama shirkadda ay iibsato shirkad kale.

Ilaalinta shaqaalaha madax bannaan (gig): joojinta kala saaridda khaldan

- In la Buriyo Sharciga Xuquuqda Shaqaalaha Dijitaalka, 2022

In la soo saaro sharci qeexaya

- In la xaqiijiyo in shaqaalaha oo idil lagu dabbaqo sharciga shaqaalaha
- In la sameeyo “imtixaanka ABC” si loo hubiyo in shaqaalaha ay yihiin kuwa madax bannaan oo heshiis lala galay, sida
 - A. In shaqaalaha uu ka madax banaan yahay kormeer iyo hagitaan marka uu gudanayo shaqada loo igmaday, sida ku xusan heshiiska lala galay.
 - B. In shaqaalaha uu howshiisa uu gudanayo si ka duwan shaqaalaha shirkadda u shaqeeya ee la qoray; iyo
 - C. In shaqaalaha uu howshiisa u gudanayo si ganacsi ah oo madax bannaan amaba ku saleysan xirfad ama ganacsi la mid ah midka shirkadda la gashay heshiiska.

DIFAAC DHAB AH EE SHAQAALAHA KU MEEL GAARKA AH

In la soo saaro sharci qeexaya

- In shirkadaha ay dusha u ritaan magdhowga ku xusan Sharciga bad qabka iyo caymiska shaqaalaha, marka shaqaalaha ku meel gaarka ay ku dhintaan shaqada amaba dhaawac uu ka soo gaaro goobta shaqada.
- Xaqiijinta in shaqaalaha ku meel gaarka ah la siiyo mushaar la siman kuwa tooska loo qortay kol haddii ay isku shaqo qabanayaan.
- Xaqiijinta in shaqaalaha ku meel gaarka ah si toos ah ay shirkadaha u qortaan ka dib markii ay 3 bilood si ku meel gaar ah u shaqeeyaan.
- Ilaalinta in shaqaalaha ku meel gaarka ah aan la ruqseyn karin inta aysan dhamaan seddexda bilood ee ku meel gaarka ah.
- Xaqiijinta in shirkadaha ay soo caddeeyaan sabab macquul ah ee la xiriirta shaqaalaha la ruqseeyay.

IN LA SAHLO KU BIIRITAANKA URURADA SHAQAALAHA

In la soo saaro sharci qeexaya:

- Xaqiijinta shaqaalaha in ay ku biiri karaan ururada shaqaalaha iyagoo saxiixaya kaarka xubinnimada.
- In shaqaalaha loo oggolaado in ay dhistaan ururo ay ku bahoobaan shaqaalaha sil-siladaha ganacsi iyo kuwa heshiisyada hoose.

- In la ballaariyo gor-gortanka shaqaalaha ee gobollada iyo qaybaha kala duwan ee shaqada.

ILAALINTA RUQSADA

CADDAALAD DARRADA AH

In la soo saaro sharci qeexaya:

- Xaqiijinta in shirkadaha ay la yimaadaan sabab ku saleysan caddaalad marka ay shaqaale ruqseeyaan.
- In ciqaabta edbinta shaqaalaha ay noqoto mid jaran-jaro oo kale ah, si la isaga ilaaliyo ruqsad caddaalad darro ah.

IN SHIRKADAH A AY DHOWRAAN SHARCIGA

In la soo saaro sharci difaacaya shaqaalaha marka ay u istaagaan xuquuqdooda isla markaana shirkadaha dusha ka saarayaa in ay caddeeyaan wax qalad ah in aysan gelin.

Intaas waxaa dheer in dawladda ay qaaddo tallaabooyin lagama maarmaan ah, sida in ay qorto shaqaale dheeri ah si loo hirgeliyo arrimaha soo socda:

- Kormeer kedis ah in lagu sameeyo goobaha shaqada.
- Ganaax culus in shirkadaha dusha laga saaro markii ay jebiyaan sharciga.
- In shirkadaha ay shaqaalaha siiyaan magdhow buuxa marka ay ku xad gudbaan sharciga, isla markaana ay bixiyaan kharajka ka baxay shaqaalaha, maadaama sharciga ay ku xad gudbeen.

AQOONSIGA DADKA QAXOOTIGA AH OO IDIL

In la taageero sharci federal ah oo qeexaya:

- In deggenaasho joogta ah la siiyo qaxootiga marka ay soo galaan
- In deggenaasho joogta ah la siiyo qaxootiga aan dukumeentiga haysan ee haatan jooga

CIRIBTIRKA ISIRKA, TAKOORIDDA IYO HANDADDAAD GOOBTA SHAQO

- In si fir-fircoon loogu ololeeyo ciribtirka isirka, takooridda iyo handadaadda goobha shaqada.
- In la qaado tallaabooyinka muhiimka u ah maalgelinta, qoritaanka shaqaale dheeri ah iyo dhammaan agabyada kale ee lagama maarmaanka u ah in si wax ku ool ah loo hirgeliyo dacwadaha ka soo horjeeda xuquuqda aadanaha.
- In la soo saaro sharci si wax ku ool ah loogu ciribtirayo dhibaatooyinka iyo handadaadda ka jira goobaha shaqada.

May 2022

Ururka Difaaca Shaqaalaha (Workers' Action Centre)

720 Spadina Avenue, Suite 223

Toronto, ON M5S 2T9

416-531-0778

info@workersactioncentre.org

www.workersactioncentre.org

Warbixinta oo buuxda oo af Ingiriis ah waxaad ka heleysaa

www.workersactioncentre.org/frontlines.